# bookSoo Koobid

> Boolisku waxay kusoo celcelinayeen in anagu aan nahay argagixisada Al-Shabaab waxayna sidoo kale dheheen ‘Soomaalidu waa sidii dameero oo kale: xaquuq kuma laha gudaha Kenya.’
> —kaasi waxaa uu ahaa qof qaxooti ah oo ka hadlayay wixii booliska Kenya ay ku dheheen asagoo ku sugnaa saldhigga booliska ee Pangani ee Nairobi taariikh 19 Nofeembar 2012.

Taariikh 19, Nofeembar 2012, booliska Kenya oo kakoobnaa cutubyo afar ah oo kala duwan ayaa mawjado xadgudubyo ah, oo jirdil uu ku jiray, kula kacay qaxooti Soomaali iyo Itoobiyaan ah iyo dad magan galyo doon ah iyo waliba Soomaali Kenyan ah gudaha xaafada Eastleigh, oo ah nawaaxi dadka u badani ay Soomaali yihiin isla markaana ka tirsan Nairobi nawaaxigaa oo dhowr kiilomitir oo qur ah u jira dagmada ganacsiga ee caasimada, safaaradaha wadamada qalaad, xarumaha Qaramada Midoobay, iyo hoteelada dalxiiska.

Sare u kicitaanka xadguduyada boolisku sare u kaceen ayaa waxay timid maalin kadib markii dad aan haybtooda la garanayn ay weerareen bas kudaha xaafada Eastleigh halkaas oo todobo qof ay ku dhinteen 30 qof oo kalena ay ku dhaawacmeen. Xadgudubyadu waxay dhammaadeen dabayaaqadii Janaanyo, dhowr maalmood kadib markii Maxkamada Sare ee Kenya ay hayadaha dowliga ah amar ku siisay inay hakiyaan qorshe lagu doonayay in dhaammaan qaxootiga magaala-joogga ah dib loogu celiyo xerooyinka qaxootiga.

Warbixintan oo ku salaysan wareysiyo tiradoodu ahayd 101, ayaa waxay caddeyneysaa xadgudubyo laga gaystay gudaha xaafada Eastleigh waqtigaa intii lagu jiray kuwaasoo si toos ah u saameeyay dad tiradoodu ku dhowdahay kun qof. Marqaatiyaal iyo dhibbaneyaal xadgudubyo loo geystay ayaa waxay u sheegeen Human Rights Watch in shaksiyaad boolis ah oo ka kala tirsan Waaxda Adeegyada Guud ee *General Services Unit* (GSU), Booliska Rigliga ah ee *Regular Police* (RP), Booliska Maamulka ee *Administration Police* (AP), Qeybta Dambi Baarista ee *Criminal Investigations Division* (CID) ay xadgudubyada geysteen,  xadgudubyadaas oo ay ku jireen kufsi, jirdil iyo haraati, xattooyo, laaluush qaadasho, iyo dadka oo si aan sharci ahayn loo xiray ayadoo la galiyay xaalado baniaadminimada ka baxsan oo dulleyn ah. Dumar badan iyo carruur ayaa ku jiray dhibaneyaasha. Booliska ayaa waxay sidoo kale xireen oo dacwado ku soo oogeen boqolaal ka mid ah dadka daggan Eastleigh ayagoo adeegsanaya dambiyada la xiriira hallaynta kala dambaynta dadweynaha balse aanan haysan wax daliil ah ka hor intii maxkamaduhu aysan amar ku bixin in dadkaa la sii daayo.

Wax yar maahee  dadka qaxootiga iyo magangalyo doonka ah ee wareysiyada  ay Human Rights kala yeelatay xad gudubyada boolisku ay ugu geysteen  xaafada Eastleigh intii u dhexeysay 19kii Nofeembar illaa dabayaaqadii Janaayo 2013 mid kastoo ka mid ah wuxuu sheegay in boolisku si ku celcelis ah ay ugu eedeeyeen in ay yihiin “argagixiso”, arintaasoo muujinaysa hal hadaf oo

xadgudubyadaa looga dan lahaa inuu u muuqdo inuu ahaa aargoosi kadib markii ku dhawaad 30 weerar laga geystay gudaha Kenya laga soo bilaabo bishii Oktoobar 2011 kuwaasoo dad aan haybtooda la garanayn ay ku qaadeen ciidamada ammaanka iyo dad rayid ah. Ilaa iyo hada hal qof oo kaliya— qof Kenyan ah oo aan ka mid ahayn qabiilka Soomaali—ayaa waxaa lagu riday xukun ah inuu asagu ka dambeeyay mid ka mid ahaa weerarada.

Intaa waxaa dheer, wax yar maahee dadka wareysiyada lala yeeshay markii la doonayay in warbixintan la qoro intooda kale ee ka midka ah 101-da ruux oo dhan mid kasta wuxuu sheegay in boolisku ay ka dalbadeen dhibaneyaasha lacago badan dabadeedna ay sii deynayeen markii ay bixiyaan, arintaasoo muujinaysa in sad bursi uu ahaa sababta ugu weyn ee boolisku u bartilmaansadeen uguna xadgudbeen dhibaneyaasha ay dhibaatada u geysteen —ee sababta ugu weyni ma ahayn in la sugo amniga qaranka.

Afartan (40) qof oo kufsi iyo carqalad ba’an loo geystay kadib markii boolisku ay ku eedeeyeen in ay yihiin argagixiso ama ay ku qasbeen in ay lacag bixiyaan, Human Rights Watch waxay ku soo koobtay in xadgudubyadaasi ay la mid noqdeen jirdilka ku xusan Mabda’a QM ee ka dhanka ah Jirdilka.

Dad la wareystay ayaa u sheegay Human Rights Watch sida boolisku u kufsadeen—ayadoo dadkaas ay ku jireen laba qof oo saf laga maray—ayadoo kufsiyadaasi ay ka dhaceen guryo gudahood, dhinacyada waddooyinka, luuqluuqyo, iyo ayadoo mararka qaarkood carruuri ay meelaha ay ka dhacayeen kufsiyadaasi ay ka ag dhawaayeen. Waxay sheegeen sida boolisku u garaaceen, sida ay laad ula dhaceen iyo sida ay u feereen—dadkaas oo ay ku jireen haween iyo carruur—joogay guryahooda, kuwo joogay waddada iyo kuwo la saaray gawaarida booliska, arintaas oo u keentay dhaawacyo halis ah iyo xanuun muddo dheer qaata. Waxay ka hadleen sidii boolisku u soo galeen guryahooda, taasoo inta badan dhacday saqda dhexe ee habeenkii, iyo goobaha ganacsiga si ay u xadaan lacago badan iyo alaabo kale oo shakhsiyaad ay leeyihiin iyo si lacag laaluush ah ay uga qaadaan si ay u sii daayaan. Waxayna sharraxaad ka bixiyeen sidii boolisku si aan sharci ahayn ay ugu xireen guryahooda, waddooyinka gudahooda, gudaha gawaarida booliska, iyo saldhigyada booliska oo boolisku mar mar ku hayeen maalmo badan ayagoo ku sugan xaalado baniaadminimada ka baxsan oo dulleyn ah ayagoo ugu hanjabayay in ay dacwado ku saabsan argagixisonimo ama hallaynta kala dambaynta dadweynaha kusoo oogi doonaan, ayadoo aan la hayn wax daliil ah.

Taariikh 13 Disembar, 2012, Waaxda Kenya u Qaabilsan Arimaha Qaxootiga (DRA) ayaa shir jaraaid gudihii ku shaacisay in mowjadaha weerarada ah ay keenayaan in dhammaan 55,000 qof oo ahaa qaxooti iyo magangalyo doon ku noolaa Nairobi ay tahay in ay u guuraan xerooyinka wadanka ee qaxootiga ee xiran ee u dhow xaduudaha Soomaaliya iyo Sudan ama lagu samayn doono dib u rarid qasab ah oo meelahaa lagu geynayo iyo in dhammaan diiwaan galinta iyo adeegyada loogu tala galay qaxootiga magaalo-joogga ah durba lasoo afjaro. Hada oo aan qoraalkan samaynayno, gebi ahaanba diiwaangalintii iyo adeegyadii intoodii badnayd weli waa istaagan yihiin.

Ka dib markii arinkaa la shaaciyay, boolisku waxay sii wadeen wayraxnimadoodii oo waxay adeegsanayeen hanjabaadahoodii ay dadkaa ugu hanjabayeen in ay u rari doonaan xeryaha ama ay u masaafurin doonaan Soomaaliya taasoo u ah marmarsiinyo dheeraad ah xadgudubyadooda iyo laaluush qaadashadooda.

Ayadoo ka shidaal qaadanaysa xujo sharci ah oo urur Kenyan ah oo aan dowli ahayn laguna magacaabo *Kituo Cha Sheria* ("Xarunta Sharciga") uu keenay 23kii Janaayo, 2013, Maxkamada Sare ee Kenya waxay horjoogsatay xerya u raridii la qorsheeyay aydoo ka fiirsanaysa bal in raritaanku uu xadgudub ku noqonayo sharciga Kenya iyo kan caalamiga ah iyo in kale. Hada oo aan qoraalkan samaynayno, waxaa qorsheysan in Maxkamadu kiiska dhagaysato 22ka bisha Shanaad, taasoo go'aan uu durba soo raaci doono.

Shaaca ka qaaditaankii raritaankii 13kii Disembar wuxuu ka baaqsanayaa inuu muujiyo in qorshaha ah in lagu qasbo tobanaan kun oo qaxooti ah oo ku nool caasimadaha Kenya inay galaan xeryo xiran uu lagama maarmaan u yahay in lagu guulaysto amni qaran oo horumarsan isla markaana sidii hore ka wanaagsan (macnaha, inuu yahay tillaabadii ugu yarayd ee wax lagu xadeyn lahaa isla markaana wax looga qaban lahaa dareemada dhabta ah ee amniga qaranka Kenya). Sidoo kalana waxay si cad ukala takooraysay muwaadiniinta Kenya iyo qaxooti maadaama siyaasadaasi u ogolaanayso in Kenyanku ay si xor ah meel walba u maraan balse ay ka horjoogsanayso qaxootiga xaqaas, oo ugu xusan Heshiiska Qaxootiga, ee Caalamiga ahaa ee kusaabsanaa Xaquuqda Rayidka iyo Xaquuqda Siyaasada, iyo sharciga Kenya.

Sharciga caalamiga ah waxaa ku xusan in raritaanka qaxooti inta laga raro caasimadaha loo raro xeryo qaxooti oo wasaq badan, buuxdhaafay isla markaana xiran kuwaasoo ay haysato hoos u dhac maalgalin oo gaareysa in ka badan $100 milyan ay sidoo kale tahay xadgudub ka dhan ah xaquuqdooda kale ee badan, oo ay ku jiraan xaqooda dhaqdhaqaaqa, xaqooda ah in aan si qasab ah looga rarin guryahooda, iyo xaqa helitaanka xaquuqda dhaqaalaha iyo arimaha ijtimaaciga ah ee asaasiga ah—sida xaqa helitaanka raashinka, maciishada, daryeelka caafimaadka, iyo waxbarashada.

Ayagoo ka baqaya in si qasab ah xeryaha lagu geeyo taasoo ah arin dhici karta iyo xadgudubyo intii hore ka badan, ayaa kumanaan Soomaali ah oo kunoolaa Nairobi ay isaga tageen caasimada, ayagoo ama ku laabtay Soomaaliya ama aaday wadamo kaloo daris ah, waa sida laga soo xigtay Qaramada Midoobay. Hadii maxkamadu xukunto in raritaanku uu yahay sharci, qaxootiga iyo magangalyo doonka aan doonayn inay u guuraan xeryaha—ay ka midka tahay xerada cusub ee Kambioos ee u dhow magaalada Dhadhaab—ama in ay u noqdaan Soomaaliya oo ammaan darro ka jirto waxaa soo wajihi doonta halista ah carqalad intii hore ka badan oo booliska uga imaan doonta.

In si qasab ah loogu raro qaxootiga magaalo-joogga ah xeryaha qaxootiga ee Kenya si ay u wajahaan xaalado nololeed oo aad u adag iyo amni darro sii kordheysa waxay sidoo kale keeni kartaa in qaxootigu halis galiyaan badbaadadooda inta ay si dhaqso ah ugu laabtaan Soomaaliya.

Arin cusub ma ahan in booliska Kenya ay xadgudubyo u geystaan qaxootiga Soomaalida ah iyo Soomaalida  Kenyanka ah. 2009kii, 2010kii iyo 2012kii, Human Rights Watch waxay ka war bixisay xadguduyo ciidanka ammaanka ee Kenya uu geystay, oo ay kujireen jirdil, kufsi, iyo qaabab kale oo xunxun oo carqalad ah, kuwaasoo lagula kacay Soomaalida Kenyanka ah iyo Soomaalida qaxootiga ah ee kunool qeybaha kala duwan ee gobolka Soomaalidu dagto ee Waqooyi Bari, meelahaas oo ay ka mid ahaayeen gudaha iyo hareeraha xeryaha qaxootiga ee Dhadhaab oo hoy u ah dad tiradoodu aad ugu  dhowdahay nus milyan oo u badan qaxooti Soomaali ah.

Dhammaan saddexdaa dhacdooyin waxaa hayadaha dowliga ahi sheegeen in ay soo baari doonaan xadgudubyada oo ay soo daabici doonaan wixii ay soo ogaadaan, laakiin ilaa iyo hada wax ay soo daabaceen ma jiraan dacwadna kuma aysan soo oogin hal qof oo ka dambeeyay xadgudubyada, arintaas oo sii hurinaysa dhaqanka sida aadka ah wax looga qoray ee isla xisaabtamid la'aanta ah ee ka dhex jira hayadaha sharci xoojinta Kenya arintaa oo u muuqata inay dhiirigalisay mowjadii ugu dambaysay ee xadgudubyada boolisku ka geysteen gudaha Nairobi.

Dabayaaqadii Janaayo 2013, ururo qaxooti oo kusugan gudaha Nairobi ayaa cambaareeyay warbixinada ku saabsan xadgudubyada boolisku ka geysteen gudaha xaafada Eastleigh bilihii bishaa ka horeeyay, laakiin bartamaha bisha Shanaad 2013, ururna ma uusan soo daabicin xog faahfaahsan oo ku saabsan xadgudubyadu siday ahaayeen iyo inta ay gaarsiisnaayeen, xataa Hayada QM u Qaabilsan Arimaha Qaxootiga (UNHCR) ee Nairobi. Ururada qaxootiga ee kusugan Nairobi waxay sheegaan in ka baaqsashadu ay ugu yaraan qeyb ka tahay sababta ah in ilaa dabayaaqadii Janaayo 2013, UNHCR aysan lahayn nidaam wax ku ool ah oo lagula socdo xadgudubyada xaquuqda oo wax looga qoro xadgudubyada taasoo macnaheedu yahay in ururada qaxootiga ay si yar ugu dhiiran yihiin in ay soo uruurshaan xog ku saabsan xadgudubyada taasoo ay la wadaagi lahaayeen UNHCR.

UNHCR waxay u sheegtay Human Rights Watch in ay la samaysay warbixino ku saabsan xadgudubyada hayadaha dowliga ah ee Kenya. Laakiin marna intii lagu jiray ama laga soo bilaabo mowjadii xadgudubyada ee 10kii asbuuc  UNHCR si cad uguma aysan baaqin hayadaha dowliga ah in ay soo baaraan ciidamadooda booliska ee wax ku xadgudba iyo in ay booliska la xisaabtamaan.

Maarso 18, 2012, Human Rights Watch waxay farriin u qortay Madaxa Booliska Kenya, Wasiirkii Amniga Gudaha ee waqtigaa jiray iyo Maamulka Gobolka iyo weliba Guddoomiyaha Arrimaha Qaxootiga anagoo sharraxaad ka bixinayna wixii aanu soo ogaanay isla markaana

codsanayna jawaab. Hada oo aan qoraalkan samaynayno, Human Rights Watch ma aysan helin jawaab.

Maadaama ay meesha ka maqan yihiin habab ay Kenya leedahay oo wax ku ool ah waxna lagula xisaabtamo oo looga hortago xadgudubyada boolisku geystaan laguna ciqaabo xubnaha booliska ka tirsan ee geysta xadgudubyo ka dhan ah xaquuqul insaanka qaxootiga iyo dadka magan galyo doonka ah gudaha Eastleigh iyo maalaha kaleba, waxaa muhiim ah in UNHCR ay si cad oo aan qalad lahayn uga soo horjeesato in xeryaha qaxootiga loo raro qaxootiga magaalo-joogga ah—taasoo weli aysan samayn—iyo in ay la socoto si cadna ay u soo tebiso wixii xadgudubyo ah oo boolisku mustaqbalka ka geystaan gudaha Nairobi iyo meelo kaleba. Deeqbixiyeyaasha ajnabiga ah, gaar ahaana kuwa maal galiya UNHCR, waa in ay ku dhiirigaliyaan UNHCR in ay sidaa yeesho.

UNHCR, dowladaha deeqaha baxsha, iyo Ergeyga Gaarka ah ee u Qaabilsan Arimaha Qaxootiga, Magangalyodoonka, Barakacayaasha iyo Muhaajiriinta Afrika gudaheeda Guddiga Afrika ee qaabilsan Xaquuqul Insaanka iyo Xaquuqda Dadka, waa in ay xadgudubyada, ay ka midka yihiin ficilada jirdilka ah ee lagu xusay warbixintan  kala hadlaan hayadaha dowliga ah ee Kenya uguna baaqaan inay soo baaraan taliyeyaashii booliska ee masuulka ka ahaa cutubyadii booliska ahaa ee joogay Eastleigh intii u dhexeysay bartamihii Nofeembar 2012 iyo dabayaaqadii Janaayo 2013 iyo inay xaqiijiyaan in xadgudubyadaas oo kale aysan mar kale dhicin.

Dowladaha deeqda baxsha waa inaysan sina u taageerin qorsheyaasha hayadaha dowliga ah ee Kenya ee sida qasabka la doonayo in qaxootiga lagu geeyo xeryaha waana in ay ku dhiirigaliyaan hayadaha dowliga ah inay ka tanaasulaan qorsheyaashaa. Deeqbixiyeyaashu waa in sidoo kale ay diidaan inay taageeraan wax kale oo dadaalo ah oo Kenya wadato oo laga yaabo inay si toos ah ama aan toos ahayn ugu qasbaan qaxootiga Soomaalida ah in ay ku laabtaan Soomaaliya ka hor wadankaa intuu ka noqonaayo meel badbaado leh oo lagu laaban karo.

## Talo bixin

### Ku socota Dowlada Kenya

### Ku socota Ku-xigeenada Madaxda Booliska Rigliga ah iyo AP-da

- Ku amra booliska in:

  -Ay joojiyaan kufsiga, garaacitaanka, iyo carqalada kale ee aan sharciga ahayn ee ka dhanka ah qaxootiga, dadka magangalyo doonka ah, iyo Soomaalida Kenyanka ah, ficiladaasoo qaarkood ay noqonayaan ficilo jirdil ah;

  - Ay joojiyaan inay si sharci aan ahayn u xiraan qaxootiga, magangalyo doonka, iyo Soomaalida Kenyanka ah, ee gaar ahaan lagu xiro saldhigga booliska ee Pangani;

- Ay joojiyaan wax ka xadida iyo laaluush ka qaadashada qaxootiga, magangalyo doonka, iyo Soomaalida Kenyanka ah;
- Ay joojiyaan ku soo oogida qaxootiga, magangalyo doonka, iyo Soomaalida Kenyanka ah dacwadaha ku saabsan dambiyada la xiriira hallaynta kala dambaynta dadweynaha ayagoon haysan wax daliil ah.

**Ku socota Guddiga Adeegga Booliska Qaranka (NPSC) iyo Hayada Dowliga ah ee Madaxa Bannaan ee Kormeerida Booliska (IPOA)**

- NPSC waa inuu:

  - Soo baaro taliyeyaasha—ay ku jiraan, hadii ay habboon tahay, madaxa ugu sareeya booliska iyo labadiisa ku xigeen—ka masuulka ahaa cutubyadii sida firfircoon uga howlgalayay Eastleigh intii u dhexeysay bartamihii Nofembar 2012 iyo dabayaaqadii Janaayo 2013, iyo weliba xubnaha booliska ee ayaga hoos imaanayay ee looga shakiyay inay geysteen xadgudubyada, iyo in uu edbiyo dacwadna ku soo oogo wixii lagu helo inay dambiyo galeen, dambiyadaas oo jirdil uu ku jiro;
  - Abuuro guddi gaar ah oo xaqiiqo raadin ah oo dib ugu soo tebiya NSPC xaddiga iyo nooca xadgudubyada boolisku geysteen, kuwaasoo uu ku jiray jirdil, loo geystay qaxooti, iyo magan galyo doon gudaha xaafada Eastleigh intii u dhexeysay Nofeembar 2012 ilaa Janaayo 2013 taasoo ay la jiraan talo bixino loogu tala galay in taliyeyaasha loo qabsado xadgudubyada;
  -Soo xaqiijiyo in guddigii la sameeyay 2010 si uu u soo baaro xadguduyada dhaqangalinta sharciga ee ka dhanka ahaa Soomaalida Kenyanka ah iyo Soomaalida qaxootiga ah ee kunool gobolka Waqooyi Bari ee Human Rights Watch ay qortay inuu daabaco wixii uu soo ogaaday iyo in guddi cusub la dhiso si uu u soo baaro xadgudubyada Human Rights Watch ay ka qortay dagmada Mandheera sanadkii 2009.
- IPOA waa in ay si cad ugu dhiirigaliso qaxootiga iyo magan galyo doonka in ay u soo gudbiyaan cabashooyin IPOA cabashooyinkaas oo ka dhan ah xubnaha booliska ee la ogaaday inay ku lug lahaayeen jirdil iyo xadgudubyo kale.
- IPOA waa in ay qaado tillaabooyin gaar ah si tillaabooyinkaasi ay gacan uga gaystaan sidii loo xaqiijin lahaa in dumarku ay si badbaado leh usoo gudbin karayaan cabashooyinka ku saabsan carqalad galmo la xiriirta oo boolisku u geystay, tillaabooyinkaas oo ay ku jiraan qarinta heybtooda in bulshadooda maxaliga ah ay garato, xaqiijinta in shaqaale dumar ah ay diyaar yihiin si ay uga qaadaan caddeymaha ay hayaan uguna gudbiyaan dadka adeegyada baxsha ee ku takhasusay caawinta dhibbaneyaasha carqalada galmada loo geysto.

**Ku socota Madaxa Ciidamada Difaaca**

- Xaqiiji in guddigii la dhisay 2012 si uu u soo baaro xadgudubyada la geysto marka sharciga la xoojinayo ee Human Rights Watch ay qortay kuwaasoo loo geystay Soomaali Kenya ah iyo Soomaali qaxooti ah looguna geystay gudaha gobolka Waqooyiga Bari Kenya in uu soo daabaco wixii uu xadgudubyadaasi ka soo ogaaday.

**Ku socota Wasaarada Arimaha Gudaha iyo Isku-xirka Dowlada Qaran**

- Ka tanaasul qorsheyaasha aan sharciga waafaqsanayn ee la shaaciyay 13kii Disember, 2012 si si qasab ah loogu raro xeryaha qaxootiga ee kuyaala Kenya qaxootiga kunool magaalooyinka Kenya.
- Soo afjar u isticmaalka xerada cusub ee Kambioos ee kutaala Dhadhaab qorshihii ahaa in la dajiyo qaxootiga magaalo-joogga ah ee kunool Nairobi iyo caasimadaha kale; taa baddalkeedii, ayadoo la adeegsanayo taageerada deeqbixiyeyaasha ajnabiga ah, kala shaqee UNHCR iyo ururada aan dowliga ahayn in ay u diyaarshaan Kambioos in la dajiyo qaxootiga iskood u doonaya in inta ay ka soo guuraan xerooyinka kale ee horay ugu yaalay Dhadhaab ee aadka u buux dhaafay ay soo dagaan halkaa.
- Ha qaadin wax kale oo tillaabooyin ah kuwaasoo looga gol leeyahay in lagu qasbo qaxootiga iyo magan galyo doonka in ay ka tagaan caasimadaha Kenya ama kuyeelan kara saamaynta aan tooska ahayn ee ah ku qasbida in ay ku laabtaan wadamadoodii oo ay kala kulmi karaan gabood fal ama carqalad guud; taa baddalkeedana, u ogolow UNHCR iyo ururada aan dowliga ahayn in ay sii wadaan oo qorsheeyaan shaqadooda ay u qabtaan dhammaan qaxootiga kusugan Kenya ilaa ay badbaado u yeelanayso in ay ku laabtaan wadankoodii.

**Ku socota Waaxda Arimaha Qaxootiga**

- Durba dib u bilow diiwaangalinta magangalyo doonka iyo dib u cusboonaysiinta warqadaha qaxootiga ku sugan magaalooyinka oo shaaca ka qaad in UNHCR iyo ururada aan dowliga ahayn ay sii wadaan adeegyo buuxa oo la siinayo qaxootiga iyo dadka magan galyo doonka ah ee ku sugan magaalooyinka.

**Ku socota Xafiiska UNHCR**

- Soo baar xadgudubyada ku xusan warbixintan ee qaxootiga iyo magangalyo doonka loo geystay Nofembar 2012-Janaayo 2013 oo soo daabac wixii UNHCR ay arintan ka soo ogaatay.
- La imow cadaadis lagu doonayo in la helo isla xisaabtan u dhexeeya booliska iyo hayadaha dowliga ah ee Kenya isla xisaabtankaas oo ku saabsan xad gudubyada noocaas ah sida waafaqsan talabixinada kor ku xusan.
- Ku taageer qaxootiga iyo magan galyo doonka in ay soo gudbiyaan cabashooyin rasmi ah oo ka dhan ah booliska, kuwaas oo ay kujiraan sheegida xubnihii booliska ka tirsanaa ee xad gudubka u geystay.
- Qorshee saraakiil badan oo loogu tala galayo in ay si fiican ula shaqeeyaan ururada aan dowliga ahayn ee kusugan xaafada Eastleigh iyo qeybo kale oo ka tirsan Nairobi si loola socdo isla markaan si wax ku ool ah wax looga soo qoro xadgudubyada boolisku geystay; hadii xadgudubyadu soo noqnoqdaan, kala hadal hayadaha dowliga ah ee Kenya, si fiican ula wadaag xogta dowladaha deeqda baxsha, oo si cad uga soo horjeedso.

- Si cad oo aan qarqarsoonaan lahayn uga soo horjeedso qorsheyaasha aan sharciga ahayn ee hayadaha dowliga ah ee lagu rarayo qaxootiga magaalo-joogga ah.
- La imow saamayn wanaagsan oo wax ka qabanaysa saamaynada xunxun ee hayadaha dowliga ah ee Kenya ay abuureen ka dib markii ay soo af jareen diiwaangalintii iyo adeegyadii qaxootiga ee gudaha magaalooyinka.
- Sheeg walaacyada laga qabo xadgudubyada booliska Kenya ay u geystaan dadka Soomaalida ah ee magangalyo doonka iyo qaxootiga ah oo, hadii aan la joojin qorshayaasha la doonayo in lagu raro qaxootiga magaalo-joogga ah, ka dhex muuji walaacyada laga qabo qorsheyaashaa shirka Guddiga Fulinta ee UNHCR ee Geneva ka dhacaya Oktoobar 2013.

**Ku socota Ergeyga Gaarka ah ee u Qaabilsan Arimaha Qaxootiga, Magangalyodoonka, Barakacayaasha iyo Muhaajiriinta Afrika gudaheeda Guddiga Afrika ee qaabilsan Xaquuqul Inssanka iyo Xaquuqda Dadka**

- Ugu baaq Kenya in ay xaqiijiso in xadgudubyada la midka ah kuwa ku xusan warbixintan aysan soo noqnoqon iyo in la edbiyo ama dacwad lagu soo oogo xubin kasta oo booliska ka tirsan oo lagu helo inuu ka dambeeyay xadgudubyo.
- Ugu baaq Kenya inay ka tanaasusho qorsheyaasheeda aan sharciga ahayn ee lagu doonayo in qaxootiga magaalo-joogga ah loogu raro xeryaha qaxootiga ee wadanka iyo inay qaddariso waajibaadkeeda caalamiga ah ee ka saaran qaxootiga iyo magan galyo doonka.
- Codso inaad soo booqato Kenya si aad ula hadasho saraakiisha dowlada, UNHCR, iyo ururada aan dowliga ahayn ee la shaqeeya qaxootiga iyo magan galyo doonka oo soo saar warbixin ku saabsan xaddiga xadgudubyada soo food saaray qaxootiga magaalo-joogga ah iyo magangalyo doonka ku sugan xaafada Eastleigh intii u dhexeysay bartamihii bishii Nofembar 2012 iyo dabayaaqadii Janaayo 2013.

**Ku socota Dowladaha Deeqda Bixiya ee Taageerada Siinaya UNHCR iyo Kenya**

- Ka hadla hayadaha dowliga ah ee Kenya xadgudubyada ku xusan warbixintan, inta ay socdaan shirarka wadamada ka dhexeeya ee ka dhacaya halka lagu qabanayo shirka Guddiga Fulinta ee UNHCR ee Geneva ka dhacaya Oktoobar 2013, uguna baaqa xaqiijinta in xadgudubyadaas oo kale aysan soo noqnoqon iyo in xubnihii booliska ee ka dambeeyay lala xisaabtamo.
- Baara dhammaan shakhsiyaadka loogu tala galay in ay xoojiyaan sharciga ee kujira tababarka ama barnaamijyada caawinta si loo xaqiijiyo in aan laga howl galinin Eastleigh intii u dhexeysay bartamihii bishii Nofembar 2012 iyo dabayaaqadii Janaayo 2013.
- Shardi ka dhiga cawimaada qeybta amniga ee kusaabsan isla xisaabtanka loogu tala galay xadgudubyadii horay u dhacay intii ay socdeen howlgalo ciidamada ammaanku ay ka fuliyeen Eastleigh, gobolka Waqooyi Bari, Mount Elgon, iyo meelo kale.

- Ku adkeysta in lagu daro qeyb ku saabsan xaquuqul insaanka dhammaan barnaamijyada tababarka ee ciidanka ammaanka sidii shardi ah cawimaad amni.

- Ku soo dara warbixino ku saabsan xadgudubyada iyo ku xad gudbida Kenya ay ku xad gudubtay sharciga caalamiga ah ee xaquuqda qaxootiga iyo xaquuqul insaanka dib u eegitaanada gargaarka dowladaha kale ay siiyaan dowlada Kenya.
- Taageera wixii dadaalo ah oo UNHCR ay ku doonayso inay ku dhiirigaliso qaxootiga iyo magan galyo doonka doonaya inay soo gudbiyaan cabashooyin ka dhan ah booliska ee ku saabsan xadgudubyo la sameeyay.
- Ku dhiirigaliya UNHCR in ay horumariso la socoshadeeda arimaha badbaadinta gudaha Eastleigh iyo qeybo kale oo ka tirsan Nairobi kana codsada UNHCR xog cusub oo joogto ah oo ku saabsan wixii ay soo ogaatay iyo taageero la xiriirta oo laga helay hayadaha dowliga ah ee Kenya.
- Ku tirtirsiiya hayadaha howliga ah ee Kenya inay ka tanaasulaan qorshaha aan sharciga ahayn ee lagu doonayo in qaxootiga magaalo-joogga ah lagu geeyo xeryaha qaxootiga.
- Ku tirtirsiiya UNHCR in ay si cad uga soo horjeedsato qorshaha raritaanka.
- Qarash si hor maris ah ha u bixinina si loogu horumariyo xerada Kambioos dabadeedna loogu isticmaalo qorshaha ah dejinta qaxootiga magaalooyinka jooga halkaa, balse si deeqsinimo leh u maal galiya horumarinteeda si loo dajiyo qaar ka mid ah dadka buux dhaafshay xeryihii horay ugu yaalay Dhadhaab si loo dhimo dadkii xeryahaa ku jiray.
- Sii wada taageerada aad siisaan ururada qaxootiga, oo ay ku jirto UNHCR, sii wadida siinta cawimaada qaxootiga Soomaalida ah ee kujira xeryaha Dhadhaab iyo badbaadada si loo xaqiijiyo inaysan dareemin in lagu qasbay inay dib ugu laabtaan Soomaaliya xaaladaha xun ee xeryaha gudahooda ka jira awgood.